



Digaag iyo hangaraarac

- ✎ Winny Asara
- 👤 Magriet Brink
- 💬 Abdi Muse
- 💬 somali
- 📊 nivå 3



Digaag iyo Dixiri waxay ahaayeen saaxiibo. Laakiin had iyo jeer waxay ahaayeen kuwo tartamo. Hal maalin waxay go'aansadeen inay ciyaaraan kubadda cagta si ay u arkaan midka ah ciyaaryahanka ugu fiican.



Waxay aadeen garoonka kubada cagta waxayna bilaabeen ciyaartooda. Digaagadu waxay ahayd mid dhakhso badan, laakiin hangaraaraca ayaa kasii dhakhso badnaa. Digaaggadu waxay u darbeysay meel fog laakiin hangaraarici ayaa u darbeeyay meel kasii fog. Digaaggadu waxay bilawday inay dareento xanaaq.




Waxay go'aansadeen in ay ciyaaraan gool ku laad. Waxaa goolhaye ku hormaray hangaraarici. Digaagtii waxay dhalisay hal gool oo kaliya. Kadibna waxay ahayd digaaggada markeedi in ay difaacdo goolka.



Hangaraarici wuu darbeeyay kubadii waa uu na dhaliyay. Hangaraarici ayaa soo ceyriyay kubada wuuna dhaliyay. Hangaraaraci ayaa madaxa ku soo tuuray kubada wuuna dhaliyay. Hangaraarici waxa uu dhaliyay shan gool.



Digaaggadu waxay ka cadhootay in ay guuldareysatay. Waxay ahayd kuuldareyste aad u xun. Hangaraarac waxuu bilaabay in uu qoslo sababtoo ah saaxiibkiisa ayaa ahaa mid sidaas u buuqa.



Digaaggadii aad ayay u xanaaqday oo waxay aad ukala qaaday afkeedii waxayna liqday hangaraaricii.



Iyadoo digaaggadi u soo socotay guriga, waxay la kulantay hangaraarac hooyadii. Hangaraarac hooyadii baa waydiisay, "Ma aragtay ilmahaygi?" Digaagada waxbo maysan odhan. Hooyadii Hangaraaraca ayaa walwashay.



Kadibna Hooyadii Hangaraaraca waxay maqashay cod aad u yar. “Hooyo i caawi!” ayuu ku dhawaaqay codka. Hooyadii Hangaraarac waxay fiirisay agagaarka oo dhageysatay si taxaddar leh. Codka ayaa ka yimid digaaggada dhexdeeda.



Hooyadii Hangaraaraca ayaa ku qaylisay,
“Isticmaal awooddaada khaaska ah cunugeyga!”
Hangaraaracyaasha waxay samayn karaan shiir
xun iyo dhadhan daran. Digaaggadii waxay
bilawday in ay dareento xanuun.



Digaaggadu waa aay daacsatay. Kadibna way liqday oo candhuuf tuftay. Kadibna way hindhistay oo qufacday. Oo qufacday. Hangaraaricii waxuu ahaa karaahiyo!



Digaaggadii waa ay qufacday ilaa ay qufacday
Hangraaricii ku jiray caloosheeda. Hooyadii
hangaraaraca iyo ilmaheedi waxay ku
guurguurteen geed korkiisa si ay iskugu qariyaan.



Laga soo bilaabo wakhtigaas, digaagga iyo hangaraacyaasha waxay is ku ahaayeen cadow.



Barnebøker for Norge

barneboker.no

Digaag iyo hangaraarac

Skrevet av: Winny Asara

Illustret av: Magriet Brink

Oversatt av: Abdi Muse

Denne fortellingen kommer fra African Storybook (africanstorybook.org) og er videreformidlet av Barnebøker for Norge (barneboker.no), som tilbyr barnebøker på mange språk som snakkes i Norge.

Dette verket er lisensiert under en Creative Commons

[Navngivelse 3.0 Internasjonal Lisens](https://creativecommons.org/licenses/by/3.0/).